**Sharciga 6 Abiriil 1960, lamba. 16 diw.**

**Dheereynta muddada sharciga 29$^{ka}$ 1959, lamba. 14, ee la xiriira wakaaladda la siiyey Xukuumadda xagga soo saaridda xeerarka cusub oo ku saabsan Nidaamka Dekadaha, ee Soomaaliya.**

**MAAMULAHA**

Markuu arkay ansixinta (oggolaanshaha) Golaha Xeerdejinta;

**WUXUU GUDDOOMINAYAA SOONA SAARAYAA**

Sharciga soo socda:

**Qod. 1**

Waxaa ilaa 30 Juun la dheereynaya muddada lagu gooyey sharciga 29 Agoosto 1959, lr. 14, ee diw., ee la xiriira wakaaladda loo siiyey Xukuumadda xagga soo-saaridda xeerarka cusub, oo ku saabsan Nidaamka dekadaha.

**Qod. 2**

Sharcigan waxa uu dhaqangelayaa maalinta lagu nashriyo Faafinta Rasmiga ah.

---

Sharcigan waxaa la gelnayaa Ururinta Rasmiga, ee Sharciyada, waxaana lagu nashrinyaa Faafinta Rasmiga. Qof kasta waxa uu ku khasban yahay in uu dhowro, loona dhowro sharci ay Soomaaliya ahaan.

Taariikhda Muqdisho, maanta, oo ah, 6$^{da}$ Abiriil 1960.

Maamulaha

**Mario Di Stefano**

Wasiirka Kowaad

**Cabdullahi Ciise Maxamuud**

Wasiirka Maaliyadda

**Cusmaan Axmed Rooble**